Somaliska

# Dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxa loogu talo galay ilmahaaga

Skolverket
Swedish National Agency for Education

Dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman wuxuu ardayda garaadkoodu dhiman yahay siinayaa aasaas fiican si ay waxbarashadooda u sii wataan kadibna ay si firficooni leh uga qayb qaataan nolosha bulshada. Waxbarashada waa inay ahaato mid la bed-bedelo si uu arday kastaaba iyadoo laga ambaqaadayo xaaladahiisa uu horumar dheer sameeyo iyadoo loo eegayo hadafka manhajka.

Waxbarashada dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqligoodu dhiman yahay wuxuu gacan ka gaysanayaa wadajirka la xiriirka bulshada iyo horumarka iyo awooda wax qabadka ardayda si madaxbanaan iyo wadajirka kuwa kale ay isla bartaan, si qoto dheer leh ay u isticmaalaan aqoonta.

## Yaa loogu talo galay dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman?

Dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waa nooc ka mid ah dugsiyada kaas oo waafaqsan guruubka ardayda kuwa lagu qiimeeyey in aanay gaaranin shurruuda aqoonta ee dugsiyada aasaasiga ah maxaa yeelay iyaga garaadkooda ayaa dhiman. Xitaa ardayda waxa soo gaaray wax wayn oo ka kooban wax qabadka hibonimade maskaxda oo yar sababtuna waxa weeye maxkaxda oo dhaawacan waxa ardaydaas qaata dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman haddii loo qiimeeyo in aanay gaaranin shuruudaha aqoonta ee gugsiyada aasaasiga ah. Waxbarashadu waxay ka kooban tahay sanad dugsiyeedada 1–9 waxana ila axad loogu talo galay sida ugu suurtogalsan inuu u dhigmo dugsiyada aasaasiga ah.

Dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqligoodu dhiman yahay tirada ardayda inta badan way ka yar yihiin marka loo barbardhigo dugsiyada aasaasiga ah iyo koorsooyinka maadooyinkaba iyo shuruudaha aqoonta oo waafaqsan guruubadaas.

## Sidee ayay raad ugu yeelataa mustaqbalka ilmaha?

In dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman la dhigto micnaheedu waxa weeye inay  helaan waxbarasho waafaqsan ardayda garaadkoodu dhiman yahay iyo waxbarasho waafaqsan baahida arday kasta iyo shuruudahooda. Laakiis dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxay leeyihiin xuduudo gaar ah markay noqoto mustaqbalka inuu qofku waxbarto iyo inuu xirfad doorto. Sidaa awgeed aad ayay muhiim u tahay inay degmadu samayso baaritaan aad u taxadar badan leh si loo qiimeeyo inuu ardaygu ka mid yahay guruubka ka tirsan dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman. Marka hore in la go'aansado inuu ardaygu dhiganayo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman. Dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxa loo soo bandhigayaa ardayga xaqa u leh una baahan oo kelya runtii.

Degmada uu qofku degan yahay ayay khasab ku tahay inay qofka mas'uulida haya siiyaan warbixin ku saabsan cawaaqibka ay u keeni karto ilmaha mustaqbalka dheer iyo kan gaabanba haddii uu ilmuhu dhigto dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigataan halka uu ka dhigan lahaa dugsiga aasaasiga ah.

## Dukumentiga lagu hogaaminayo dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman

- Sharciga iskuulka
- Qaraarka iskuulka dawlada
- Manhajka waxbarashada ee gudsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman ee 2011 kaas oo leh qorshaha koorsooyinka iyo shuruuda aqoonta

### QORSHAHA KOORSOOYINKA IYO SHURUUDA AQOONTA

Koorso kasta qorshaheeda iyo maaddo walba qaybteeda in la qeexo maaddaada ama qaybta maaddada sababta ay iskuulka ugu jirto. Waxa kaloo iyana la sii qeexayaa ujeedada waxbarashada laga leeyahay iyo karaanka wax qabadka ardayga ee la rabo in fursad la siiyo si uu ugu horumaro.

Muhiimada koorsada maaddo kastaaba ay ka kooban tahay waxay sharaxaysaa sidii macalimiintu ay ugu daryeeli lahaayeen wax dhigistooda ama sida ay wax u dhigayaan. Maxaa yeelay dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman

waxay leeyihiin qorsheyaal waafaqsan qorshaha koorsooyinka oo dham, gaar ahaam markay noqoto qaybaha qoraalada leh ama tiyoriiga leh. Micnaheedu waxa weeye tusaale ahaan xisaabta iyo maadooyinka sayniska ah inta badani waxay waafaqsan yihiin ardayda dhigata dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato halka ay maaddooyinka tusaale ahaan muusiga iyo sawirka waxay isku mid yihiin dugsiga aasaasiga ah hoose/dhexe. Doorashada luqada/ luqadaha casriga ah, tusaale ahaan isbaanishka iyo jarmaku maado ahaan kuma jiraan dugsiyada aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato.

Kooras kasta qorshaheeda waxa laga helayaa oo ay ku jirtaa xitaa shuruuda aqoonta kaas oo ay ku qeexan tahay aqoonta laga doonayo ardayda si ay u gaaraan heerka shahaadooyinka ee kala duwan.

### ISBARBARDHIGA JADWALKA DUGSIGA AASAASIGA KHAASKA AH EE ARDAYDA CAQLIGA DHIMANI DHIGATO IYO DUGSIYADA AASAASIGA

| Dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman | Dugsiga hoose/dhexe |
|---|---|
| Sawir | 225 | 230 |
| Guriga- iyo aqoonta macmiisha | 525 | 118 |
| Ciyaarah iyo caafimaadka | 750 | 500 |
| muusiga | 395 | 230 |
| Farsamada gacanta nijaarada/harqaanka/toliinka | 730 | 330 |
| Luqada iswiidhishka iyo luqada iswiidhiska ee carruura ajaanibka loo dhigo | 1 300 | 1 490 |
| Ingiriisi | 180 | 480 |
| Xisaab | 1 005 | 1 020 |
| Maaddooyinka arrimaha bulshada: joqraafi, taariikh, aqoonta diimaha iyo aqoonta arrihama bulshada | 695 | 885 |
| Maadooyinka sayninska: baayoolaji, fiisikis, kimisteri iyo tikniig | 785 | 800 |
| Doorashadda luqadaha | | 320 |
| Doorashada ardayga | 195 | 382 |
| **Guud ahaan saacadaha la dammaanad qaaday** | **6 785** | **6 785** |
| Halkaas oo uu iskuulku dooran karo | 1 800 | 600 |

Maadooyinka guriga iyo aqoonta macmiisha, ciyaaraha iyo caafimaadka iyo farsamada gacanta nijaarada/harqaanka/toliinka saacaduhu aad ayay ugu badan yihiin dugsiga aasaaska khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato marka loo eego dugsiga aasaasiga/dugsiga hoose dhexe. Maadada ingirisida saacaduhu aad ayay uga yar yihiin dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato marka loo fiirinayo kan dugsiga aasaasiga ee  hoose dhexe.

## Hadafka tababarka dugsiga

Dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato gudihiisa xitaa waxa jira wax la yiraahdo hadafka tababarka dugsiga. Tababarkaas waxa loogu talo galay ardayda lagu qiimeeyey in aanay ka faa'iidaysanayn maadooyinka qaar ka mid ah ama maadooyinka dhammaantoodba ee dugsiga aasaaska khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani ay dhigato. Waxay ardaydu beddelkeeda baranayaa maadooyinka qaybahooda .

Haddii iskuulku u arko in ardaygu uu shuruuda ka soo bixikaro, wuxuu ardaygu israacinayaa inuu barto maadooyinka dugsiga aasaaga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato iyo qaybaha maadooyinka.

### HADAFKA TABABARKA DUGSIGA WAXA KU JIRA

- Waxqabadka  bilicda leh

Ta ugu muhiimsan waxa lagu daryeelayaa qaybaha ay ku jiraan muusiga, sawirka, iyo farsamada gacanta.

- Xiriirinta ama is-gaarsiinta

Ta ugu muhiimsan waxa lagu daryeelayaa qaybaha ay ku jiraan iswiidhishka iyo luqadda afka hooyo.

- Dhaqdhaqaaqa

Ta ugu muhiimsan waxa lagu daryeelayaa qaybaha ay ku jiraan ciyaaraha iyo caafimaadka.

- Waxqabad maalmeedka

Ta ugu muhiimsan waxa lagu daryeelayaa qaybaha ay ku jiraan guriga- iyo aqoonta macmiisha iyo aqoonta bulshada.

- Xaqiiqda aragtida

Ta ugu muhiimsan waxa lagu daryeelayaa qaybaha ay ku jiraan sayniska, tigniiga iyo xisaabta.

**HADAFKA TABABARKA JADWALKA EE DUGSIGA AASAASIGA KHAASKA AH EE ARDAYDA CAQLIGA DHIMAN**

| | |
|---|---|
| Estetisk verksamhet | 995 |
| Isgaarsiinta | 995 |
| Dhaqdhaqaaqa | 995 |
| Waxqabad maalmeedka | 995 |
| Xaqiiqda aragtida | 995 |
| Xulashada ardayga | 190 |
| Wakhti waxbarasho oo la qaybin karo | 1 500 |
| **Guud ahaan saacadaha la dammaanad qaaday** | **6 665** |

## Qiimayn

Aad ayay muhiim u tahay inay macalimiintu mar walba siiwadaan tababarka badan iyo xiisogelinta arday walba waxbarashadiisa si uu arday walba u helo fursada uu ku gaaro meel aad u dheer horumarkiisa aqooneed. Si uu mas'uulka ilmuhu ula socdo horumarka ilmihiisa waa inuu wadahadalada mas'uulka, ilmaha iyo macalinku (utvecklingssamtalen) uu noqdaa mid mustaqbalka soo socda iyo kii la soodhaafayba. Mustaqbalka soo socda in la qeexo ama la sharaxo sidee ayuu ardaygu sida ugu wanaagsan loo caawin karaa ama loo taageeri karaa iyo dadaalada loo baahan yahay in la geliyo si uu ardaygu u gaaro shuruuda aqoonta ee maadooyinka ama qaybaha maadooyinka ee ardayga la baray ama uu waxbarashadooda qaatay. Dib marka loo jaleecayo in la qiimeeyo horumarkii uu ardaygu soo maray iyadoo loo eegayo hadafka  manhajka waxbarashada iyo shuruuda aqoonta ee koorasyada laga doonayo.

Ardayda dhigata maadooyinka dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxaa qiimaynta loogu samaynayaa dhinaca shuruuda aqoonta ee sannad dugsiyeedada 6aad iyo 9aad. Hadafka tababarka ee dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxa jir labo heer oo ku saabsan shuruuda aqoonta ee dhammaadka sannad dugsiyeedka 9aad; aqoonta aasaaska iyo aqoon qotada dheer.

### CADDAYN, QIIMAYN WAXBARASHO IYO SHAHAADO

Marka uu arday dhameeyo waxbarashadiisa dugsiga aasaasiga ee ardayda caqligoodu dhiman yahay waxaa isaga ama iyada la siinayaa caddayn ku saabsan waxbarashadiisa. Haddii uu arday ama qofkii mas'uulka ahaa uu codsado taas waxa caddaynta loogu dhammaystirayaa iyadoo loo raaciyo qiimayn guud oo waxbarashadiisa ku saabsan. Qiimaynta waxbarashada waxaa lagu qeexayaa fursada ardayga in lagu sharaxo waxbarashadii laakiin aan la bixinaynin wax shahaado ah.

Maadooyinka qaybta dugsiga tababarka wax shahaado ah laguma bixinayo wax intaa siidheer qiimaynta marka la samaynayo waxa tixgelin la siinayaa kartidooda shakhsinimo ee arday kasta.

Maadooyinka dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waxa shahaado lagu siinayaa waxyaabaha ku salaysan shuruudaha aqoonta ee ee dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigato. Shahaadadaas looma barbardhigi karo shahaadada dugsiga aasaasiga ah.

Si ardayga shahaado loo siiyo waxa khasab ah inuu ardaygu ama qofka mas'uulka ka ah ardayga ay codsadaa arrintaas. Waxa ugu muhiimsan arday dhiganaya qaybata

tababarka iskuulka laakiin dhiganaya maaddo ama maaddooyinka dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman wuu codsan karaa shahaadada maaddadaas ama maaddooyinkaas ardaygu baranayo.

Kadib marka ardaygu dhameeyo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman wuxuu ardaygu sii codsan karaa waxbarashada dugsiga sare ee ardayda caqliga dhiman inuu sii wato. Waxaa muhiim ah in la ogaado in aan shahaadada dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman aanay u qalmin inay ku galaan borogaraamada qaranka ee dugsiyada sare. Hase yeeshee ardayda dugsiga aasaasiga khaaska ee caqliga dhiman waxay aadi karaan ama dhigan karaa borogaraamaka horudhaca ee xirfadda ama (introduktionsprogrammen yrkesintroduktion) iyo waxa la yiraahdo doorashooyinka shakhsiga ee dugsiyada sare ama (individuella alternativ i gymnasieskolan).

Heerarka shahaadooyinka waxa la isticmaalayaa mid ka mid ah A, B, C, D, ama E. Shuruuda aqoonta  ee heerarka shadaadada waxa lagu faahfaahiyey A, C, iyo E. Shahaadada E waxay u dhigantaa ama u qlantaa inuu gudbay imtixaankii halka ay A ka noqonayso shahaadd
ada ugu saraysa. Haddii dadka mas'uuliyiinta ah ama ardayga laftiisu uu dalbado ama ay dalbadaan hal ama maadooyin badan shahaadadood kuwaas oo uu ardaygu dhigtay, waa in loo sameeyo shahaado ah dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda

caqliga dhiman ee maadadaas ah dhammaadka xilli dugsiyeedka kasta laga bilaabo fasalka 6aad ilaa iyo xilliga dayrta ee fasalka 9aad shahaadada xilligaa joogta (terminbetyg), iyo marka maado la dhameeto.

Haddii uu arday dhigtay maaddo ka mid ah maaddooyinka dugsiga aasaasiga ah ee ku jira qorshaha koorsooyinka (kursplaner) waxaa ardayga lagu qiimaynayaa shuruuda aqoonta iyadoo loo fiirinayo qorshaha koorsadaas (kursplanen) kadib waa inay shahaadadu noqoto shahaadada dugsiga aasaasiga ah. Micnaheedu waxa weeye hal arday wuxuu helikaraa labo shahaado oo kala nooc ah: mid dugsiga aasaasiga khaaska ee ardayda caqliga dhiman taas oo la siinayo shahaado ah maadooyinkii uu ardaygu dhigtay sida ku qoran qorshaha koorsooyinka ee dugsiga aasaasiga khaaska ee ardayda caqliga dhiman, iyo shahaado dugsiga aasaasiga ah taas oo uu ardaygu dhigtay maadooyinka sida uu dhigayo qorshaha koorsooyinka.

Qofka doonaya inuu intaa in ka badan akhriyo manhajka (läroplaner), qorshaha koorsooyinka (kursplaner) iyo shuruuda aqoonta (kunskapskrav) bogga skolverket: www.skolverket.se

## Isdhexgalka dugsiga aasaasiga ah

In lala dhigto ardayda kale ee ay isku baahida yihiin dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman iyo shardiga karaanka, ardayda qaarkood, ayaa fursadoodu kor u kacdaa inay ka dhexeeyaan labada dhinac xiriirkoodu iyo saaxiibtinimo dooduba.  Ardayda qaarkood waxay bulsho ahaan ka helaan dugsiga aasaasiga ah markaa waxa jiraysa fursad isdhexgal ah. Taa micnaheedu waxa weeye in waxbarashada oo dhan ama qayb ka mid ah lagu dhigto fasalada dugsiga aasaasiga ah laakiin ardaydu waxay baranayaan oo lagu qiimaynayaa qorshaha koorsooyinka ee loogu talo galay in lagu dhigto dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman.

Dadka ma'suuliyada carruurta iska leh/waalidiintu waxay codsankaraan inay carruurtooda dhigata dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman dhigato inay isdhexgal sameeyaan, laakiin arrintaasi inay suurtogal tahay wax go'aankeeda iska leh dugsiga aasaasiga ah iyo cidda mas'uulka ka ah (huvudmän). Laakiin beddelkeeda waxa la oran karaa haddii iskuulku ama cidda iskuulka mas'uulka ka ah (huvudmannen) ay jecel yihiin in hal arday isdhexgal lagu sameeyo ama dugsiga aasaasiga ah uu ardayda la dhigto waa suurto gal haddii labada qof ee mas'uuliyada ilmaha iska leh /waalidiinta ay ku raacaan arrintaa.

## Habka geedi-socodka qaabbilaada dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman

arday, mas'uulka ardayga iyo shaqaalaha dugsiga barbaarinta xannaanada ama dugsiga aasaasiga ah ayaa soo jeedin karan su'aasha ku sabsan in arday dhigan karo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigataan. Marka su'aasha la soo bandhigo inuu noqon karo xalku dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigtaan markaa ardayga degmada uu degan yahay (waa degmada uu ardaygu ka diiwaangashan yahay) ayaa ka mas'uul ah inay gudagalaan ama fuliyaan baaritaan arrintaa ku saabsan.

Baaritaanku wuxuu keeni doona jawaab ah haddii uu arday ka mid noqon karo guruubka ama kooxda loo danleeyahay ee dhiganaysa dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman. In laga tirsanaado kooxdaas micnaheedu waxa weeye in ardayga daraadkiisu dhiman yahay, in ardayga qayb ahaan lagu qiimaynayo in aanu gaaraynin shuruuda aqoonta ee dugsiga aasaasiga ah

## SIDEE LOO SAMEEYAA BAARITAAN?

Baaritaanka waxa la sameeyaa marka ardaygu caadiyan dhiganayo dugsiga xannaanada iyo barbaarinta carruurta ama hadhoowto marka uu ardaygu dugsiga aasaasiga ah dhiganayo. Si loo bilaabo baaritaan waxa khasab ah in wadatashi lala sameeyo dadka mas'uuliyiinta ah. Dadka mas'uuliyiinta ahi marka laga reebo ardayga naftiisa, waa wax aad ugu mihiim ah asalka baaritaanka.

Baaritaanku wuxuu ka kooban yahay afar shay oo mid waliba goonidii u taagan; mid la xiriirta xaga waxbarashada, mid la xiriirta xaga cilmi nafsiga ama saaykoolojist, mid la xiriirta dhinaca qiimaynta dawada iyo qiimayn la xiriirta xaga bulshada. Waa muhiim in lawada helo qaybahan oo dhan si sawir guud looga qaato sida ugu macquulsan.

- Tan la xiriirta qiimaynta wabarashada

Tan la xiriirta qiimaynta waxbarashada waa in uu fuliyo qof shaqaalaha dugsiga ka mid ah oo awood xirfadeed u leh waxbarasho khaas ah. Ujeedada laga leeyahay waa in la qeexo inuu ardaygu ka bixikarayo oo uu gaarayo shuruudaha aqoonta ee dugsiga aasaasiga ah/dugsiyada hoose dhexe. Qiimaynta lafteeda waxa haboon in lagu in lagu qeexo wixii ay dugsiga xannaanada iyo barbaarinta ama uu iskuulku hore u soo sameeyey si ardayga shaqaduu qabanayo baahidiisa loo waafajiyo iyo natiijadii ka soo baxday.

- Tan la xiriirta cilmi nafsiga ama saaykoolajiga

Tan la xiriirta cilmi nafsiga ama saakoolajiistaha waxa qabanaya saakoolajiiste la aqoonsanyahay. Ujeedadu waa inuu tuso inuu ardayga garaadkiisu hooseeyo markaa, haddii ay jirto, ilaa heerkee ayay gaarsiisan tahay. Si loo bilaabo qiimaynta saaykoolajiistaha waxa marka hore loo baahan yahay aqbalaada mas'uuliyiinta.

Mar ama wax ka badan marka la fuliyo imtixaan tijaabo ah oo hibodda maskaxda ku saabsan si loo arko heerka xaga horumarka ardaygu joogo. Qiimaayntaa saaykoolajiistaha waxa kaloo haboon inay ku caddahay sida uu ardaygu ula dhaqmayo xaaladaha bulshada (waxa la yiraahdo xadaddka awoodaha). Waxa jira sababo kale oo uu saakoolajiiste ku iman karo markay ardayga waxbarashadu ku adah tahay. Markaa waxa loo baahan yahay inay qiimaynta ku caddahay.

- Tan la xiriirta dhinaca qiimaynta dawada

Tan qiimaynta dawada waxa fulinaya takhtar la aqoonsanyahay, ama shaqaale kale oo ka socda caafimaadka iyo daryeelaka bukaanka oo leh waxbarasho ku filan. Ujeedadu waa in la cayimo haddii ay jiraan sababo keenaya inay ardayga ku adkaanayso marka uu waxbaranayo iyo haddii ay taasi caddaynayso in ardayga garaadkiisu dhiman yahay. Si loo bilaabo qiimaynta dawada waxa marka hore loo baahan yahay aqbalaadda mas'uuliyiinta.

Waxa jirta sababo kale oo uu takhtarku ku iman karo markay ardayga waxbarashadu ku adag tahay oo aan ka ahayn garaadka ardayga oo dhiman. Markaa waa inay qiimaynta ku caddahay.

- Tan la xiriirta dhinaca qiimaynta bulshada

Tan la xiriirta qiimaynta bulshada waxa fulinaya la taliyaha ardayda kala taliya marka ay dhibaato jirto ama qofkale oo leh waxbarasho ku habboon ujeedaduna waxa waa in la qeexo haddii ay jiraan sababo xaga la dhaqanka bulshada ah, iskuulka gudihiisa iyo banaankiisaba, kuwaas oo qayb ka qaadan karan inay ku adkaato ardayga waxbarashadu. Haddii aanay jirin sababo noocan oo kale ah waxa habboon inay ku caddahay qiimaynta.

## ARDAYGU XAQ MA U LEEYHAY DUGSIGA AASAASKA KHAASKA AH EE ARDAYDA CAQLIGA DHIMAN?

Marka ugu horaysa ee qiimaynaha oo dhami soo dhammaadaan baaritaankana la soo dhammaystiro ayaa go'aan la gaari karaa inuu ardaygu xaq u leeyahay inuu dhigan karo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman, waxa la oran karaa iyada ama isagu waxy/wuxuu ka mid yihiin kooxga guruubkaas. Qaraarka noocaas ah waxa gaaraya degmada uu ilmuhu degan yahay.

## DADKA MAS'UULIYIINTA AHI XAQ AYAY U LEEYIHIIN INAY YIRAAHDAAN HAA AMA MAYA

Intaan degmadu go'aan ka gaarin in arday loo qaabilo in la gaynayo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman waa in ay laba mas'uulba qoraal ku ogolaadaan arrintaas oo ay haa yiraahdaan. Haddii labada mid ka mid ahi yiraahdo haa taasi suurtogal ma noqonayso in dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhimani dhigtaan la geeyo.

Mas'uuliyiintu xaq ayay u leeyihiin inay yiraahda maya xitaa haddii boos looga helo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman, inkastoo baaritaankii muujiyey in ilmuhu xaq u leeyahay in la qaabilo. Degmadu markaa waxay ku khasban tahay inay ardayga ku qaabilaan dugsiga aasaasiga/dugsiga hoose dhexe oo ay sameeyaan in kaalmo la siiyo ardayga iyo baahida ila axad lagama maarmaanka ah sidii ay suurtogal u noqon lahayd in la gaarsiiyo  shuruudaha aqoonta ee ugu yaraan larabo inuu gaaro.

Mas'uuliyiintu waxay marwalba inta uu iskuulku soconayo codsan karaan in ilmaha la geeyo dugsiga aasaasiga/dugsiga hoose dhexe.

## TIJAABINTA DUGSIGA AASAASIGA KHAASKA AH EE ARDAYDA CAQLIGA DHIMAN

Haddii ardayga lagu soo casumo inuu boos ka helay dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman laakiin mas'uuliyiintu ka shakisan yihiin inay arrintaasi xal fiican tahay, waxa jirta fursad uu ardaygu ku tijaabin karo inuu dhigto dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayga caqliga dhiman ugu badnaan lix bilood.

## GO'AANKA KU SAABSAN QAABILAADA

Kadib marka ay mas'uuliyiintu oggolaadaan oo ay yiraahdaan haa ayay degmada ilmuhu degan yahay go'aan gaarayaan sidii ardayga loogu qaabili lahaa dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman. Waxa kaloo iyana muhiim ah oo loo baahay yahay in la go'aansado inuu ardaygu baranayo maadooyinka dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqlig dhiman ama qaybaha maadooyinka (hadafka tababarka iskuulka). Go'aanka waxa gaaraya cida waxbarashada iskuulka ka mas'uulka ah waxaana lagu salaynayaa wixii baaritaanka ka soo baxay.

Kadib wuxuu ardaygu sida ugu dhakhsaha badan bilaabayaa qorshihii waxbarashada ee maadooyinka  dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman ama qaybaha maadooyinka. Haddii go'aanku noqdo in arday loo qaato dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman micnaheedu xitaa waxa weeye inuu ardaygu bedelayo fasalka ama iskuulka in sida ugu dhakhsaha badan la bilaabo sidii uu ula qabsanlahaa dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman sannad dugsiyeedkaa lagu jiro gudihiisa, khasab ma aha in la sugo inuu biloowdo xilli cusub (ny termin).

## HADDII AAN ARDAYGA LAGU CASUMIN BOOS DUGSIGA KHAASKA AH EE ARDAYDA CAQLIGA DHIMAN

Baaritaanku wuxuu muujinkaraa in aanu ardaygu xaq u lahayn inuu bilaabo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman. Haddii degmada uu ardaygu degan yahay go'aansato in aan ardayga loo soo bandhigayn inuu dhigto dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman inkasta oo ay mas'uuliyiintu doonayaan waxa markaa go'aanka uga dacwoon karaan guddida loo dacwoodo ee habka nidaamka caddaalada dugsiyada (Skolväsendet). Labada qof ee mas'uuliyada lihiba waa inay isku af-gartaan inay ka dacwoonayaan go'aanka.

## SABAB XAD DHAAF AH

Marmar waxa imakarta xaalado ay ma'uuliyiinta iyo degmada uu ardaygu degan yahay aanay isku raacin ama heshiis ku noqonin nooca iskuulkee ayaa u wannaagsan ilmaha. Inay degmadu go'aansato in ardayga loo meeleeyo in lagu qaabilo dugsiga aasaasiga khaaska ah ee ardayda caqliga dhiman iyagoo aanay mas'uuliyiintu/waalidiintu doonaynin. Waxaase laga yaabaa inay jirto xaalad ila axad xad dhaaf ah oo la qiimaynayo in mudnaan lasiiyo waxa ilmaha u fiican. Waa wax aan caadi ahayn inay degmadu gaarto go'aan ka soo horjeeda rabida mas'uuliyiinta/waalidiinta. Haddii ay dhacdo, waa in go'aanka sababta ay sidaa u noqotay iyo sabata ka danbaysa la caddeeyo. Go'aanka waxa looga dacwoon karaa guddida loo dacwoodo ee habka nidaamka caddaalada dugsiyada (Skolväsendet).

## BOOS QALDAN OO ARDAYGA LA GEEYO

Haddii ay si uun u soo baxdo qaabilaadii ardaygu in aanu kooxdaas ka tirsanayn waxa muhiim ah inay degmada uu ardaygu ka tirsan yahay ay u bedelaan nooca iskuulka oo markaa bedelkeeda loo dhigo oo la raaco xeerarka dugsiyada aasaasig ah.

## Miyaad doonaysaa inaa akhrido manhajka waxbarashada oo dhan?

Waad dalbankartaa ama waad ka soo dejisankartaa manhajka waxbarashada bogga internetka ee www.skolverket.se

**ISBN 978-91-7559-138-4**
**Graphic design: Typisk Form designbyrå**
**Photo: Michael McLain (page 1, 3, 6, 9, 12, 18)**
**Anette Andersson (page 13, 15)**

**Skolverket 2014**

Skolverket
Swedish National Agency for Education